EARLY CHILDHOOD

# KU MEEL GAAR: BILAWGA FIICAN EE DUGSIGA

## Xaashida macluumaadka qoysaska

**Bilaabida dugsiga ayaa noqon kara mid leh loolan iyo xiiso labadaba. Xaashidaan macluumaadku waxay sharaxdaa sida ilmahaaga adeegiisa ilmanimada hore u caawimi doonto ilmahaaga si uu u yeesho bilaw wax ku oolla oo dugsiga.**

Ilmahaagu wuxuu horay u soo maray marxalada badan, sida:

- Ka soo tegida hal hawl ama mid kale oo caadi ah
- Aadida maalma-cayaareed ama fasaxyo
- bilaabida xannaano ilmood ama kindergarten.

Waaya-aragnimadaasi waxay ku siisaa fikrada sida ilmahaagu uga falceliyo goobaha cusub iyo waxyaallaha iyo kaalmada ay u baahan yihiin.

### MAXAY BILAABIDA WAX KU OOLKA AHI MUHIIM UGU TAHAY DUGSIGA?

Bilaabida wax ku ool ahi waxay caawintaa ilmahaaga.

- inuu yeesho bilaabid fiican ama natiijooyinka samaqabka
- iska ilaali carqaladaha waxbarashadooda iyo horumarkooda
- dareen amaan, kalsooni iyo ku xirnaan.

### KU QORIDA ILMAHAAGA DUGSIGA

Dugsiyada badankood waxay bilaabaan qaadashada isqorida bisha May oo sanadka ka horeeya intaan carruurtu bilaabin dugsiga.  Ku qoridu waxay ku siisaa fursada badan si aad u ogaato dugsiga ugana qaybgasho gudbida xarakaadka dugsiga.. Gudbida Carruurta waa ka fiican yihiin marka xarakaadkaani ka bilawdo ka hor dhamaadka sanadka siina socdo ilaa maalmaha ugu horreeya ee dugsiga.

### U GUDBIDA BARNAAMIJYADA DUGSIGA IYO XARAKAADKA

U gudbida Dugsiga hawlihiisa wuxuu caawimi doonaa adiga iyo ilmahaaga yar.

- waxaad fahmi doontaa wuxuu dugsigu noqon doono
- wuxuu saaxiib la noqonayaa carruur kale iyo qoysas.

### U GUDBIDA WAXBARASHADA IYO CADDAYNTA HORUMARKA

Macalinka ilmanimada hore ee ilmahaaga ayaa qori doona Caddaynta Horumarka ( oo loo yaqaan Caddaynta Gudbida). Caddaynta Gudbida waxay caawintaa ilmahaaga dugsigiisa iyo macalinka bareebka si uu u ogaado ilmahaaga iyo qorshaha barashadooda. Caddaynta u Gudbida waxaa ku jiri doona:

- ilmahaaga magaciisa, taariikhda dhalashada iyo sawir
- magacaaga iyo faahfaahinta meesha lagala xiriirayo
- magaca iyo faahfaahinta meesha lala xiriirayo ee adeega ilmanimada hore iyo midnadlayaal kasta oo kuwaas oo caawimaya ilmahaaga
- macluumaad ku saabsan waxa ilmahaagu xiisaynayo, xirfadaha iyo awoodaha
- Istaraatiijiyada ugu fiican ee ilmahaaga waxbaridiisa.

Haddii ilmahaagu aadi doono Daryeelka Saacadaha Dugsiga Ka-dib (OSHC), Caddaynta Gudbida waxaa iyadana lala wadaagay OSHC.

Waxaa lagu siin doonaa koobiga Caddaynta u Gudbida Ilmaha oo la buuxiyey.  Waxay caawimi kartaa inaad fahamto, kaalmay kalana hadal ilmahaaga barashadiisa.

Ilmahaaga Caddayntiisa u Gudbida waa caawintaa:

- Qorshay waxa ilmahaagu xiisaynayo
- kaalmada gudbida sahlan ee ilmahaaga ilmanimadiisa hore adeega dugsiga.

Caddaynta u Gudbida badanaa waxaa la qoraa teeramka afraad (4aad). Si kasta ha ahaatee haddii ilmahaagu qabo iin ama daahid koritaan, Bayaanka Gudbinta horay ayaa loo qori karaa, Juun ama Luulyo. Kani waa ku caawimaa adiga iyo dugsiga si loo bilaabo qorshaynta caawima kasta oo ilmahaagu baahan yahay.

Caddaynta Gudbidu waxay leedahay qayb aad buuxinayso. Sababtoo ah wax badan ayaad ka ogtahay ilmahaaga, wax ka dhidaadu waa muhiim.. Waxay ka caawimi doontaa qorshaha dugsiga bilaw wax ku oolla adiga iyo ilmahaaga.

Education and Training

Waxaa jira qayb ilmahaagu buuxinayo, iyada oo uu caawimayo qof qaangaara sida adiga ama barahooda ilmanimada hore. Waxaa lagu dari karaa:

- Sawirida
- Waxa ilmahaagu ka xiisanaya dugsiga
- Waxay ka fekerayaan dugsi bilaabida.

## SIDA MACLUUMAADKA LOO WADAAGO

Caddaynta Gudbida waa la wadaagaa waxayna lagu kaydiyaa online iyada oo la isticmaalayo foomk aloo yaqaan Insight Assessment Platform. Macluumaadka Insight Assessment Platform waxaa loo kaydiyaa si amaana Australia.

Dhamaan Dugsiyada xukuumadaha Fiktooriya (qaar ka mid ah  dugsiyada madaxa banaan ee  Catholic-ga) waxay isticmaalaan Insight Assessment Platform si loo kaydiyo ilma walba barashadiisa iyo horumarkiisa. Haddii ilmahaaga dugsigiisa aanu isticmaalin Insight Assessment Platform, waxaa la siin doonaa xaashi ama koobi elektaroonig ah oo Bayaanka Gudbida.

Wasaarada Waxbarashada iyo Barbaarintu mamarka qaarkood waxay isticmaalaan adeeg bixiyayaal dibada ah. Adeeg bixiyayaasha u shaqaynaya Wasaarada waxaa waajiba inay isticmaalaan Cabirada amaanka macluumaadka. The Insight Assessment Platform waxay u hogaansan tahay Wasaarada **Macluumaadkeeda gaarka ah** www.education.vic.gov.au/Pages/privacypolicy.

Wasaaradu waxaa laga yaabaa inay isticmaasho macluumaadka Caddaynta Gudbinta xagga la socodka iyo cilm-baarista. Macluumaadkaan waxaa lagu gudbinayaa nambaro iyo hab-xisaabeed carruurtana **laguma** xusayo.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Insight Assessment Platform, kala xiriir wasaarada psts@edumail.vic.gov.au.

Marmarka qaarkood Waxbarashada Fiktooriya iyo mihnadlayaasha daryeelka waxay u baahan yihiin inay la wadaagaan macluumaadka si kor loogu qaado samaqabka ilmah aiyo amaanka.  Adeegaaga waxbarashada ilmanimada hore waxaa laga yaabaa inuu la wadago macluumad ku saabsan ilmahaaga iyo qoyskaaga markay lagama maarmaan tahay si wax looga qabto waajibaadka daryeelka, lidka-takoorida, mihnada caafimaadk iyo amaan, iyo samaqabka ilmaga iyo waajibaadyada amaanka. Macluumaad intaas ka badan, booqo https://www.vic.gov.au/information-sharing-schemes-and-the-maram-framework.

## MACLUUMAAD INTAAS KA BADAN

Fadlan booqo www.education.vic.gov.au/transitiontoschool.

Dukumintigaan waxaa lagu helli karaa luqada badan www.education.vic.gov.au/transitiontoschool.